



# Magaaladaada. Codkaaga. Oktoobar 24

[toronto.ca/elections](https://toronto.ca/elections)

Bilow inaad isticmaashid MyVote Sebtembar 1.

Barnaamijka shabakada MyVote waxa uu leeyahay wax walba oo uu kuugu diyaarinayo doorashada dawlada hoose ee Toronto.

Ka baro wax badan: [toronto.ca/elections/MyVote](https://toronto.ca/elections/MyVote)



# Xulashadaada Codaynta

## Qof Ahaan

Waxaad u codayn kartaa qof ahaan mid ka mid ah maalmaha cod bixinta ee diyaarsan. Horey u codee inta lagu jiro codbixinta hormariska ah ama maalinta doorashada, Isniinta, Oktoobar 24.

## Ku Codee Boostada

### Tallaabada 1aad: Codso Codaynta Boostada

- Laga bilaabo Sebteembar 1, booqo [toronto.ca/VoteByMail](https://toronto.ca/VoteByMail)
- Ugu danbaynta la codsan karo waa Jimcaha, Sebteembar 23 4:330 galabnimo

### Tallaabada 2aad: Buuxi xirmadaada

Marka la oggolaado, waxaa lagu soo diri doonaa xirmada Codaynta Boostada si aad u dhammaystirto.

- **Saxeex** Foomka Caddaynta
- **Calaamadi** warqadda codbixinta
- **Geli** baqshadda sirta ah ee xiran Baqshadda hurdiga ah ee soo Celinta

### Tallaabada 3aad: Dir Xirmadaada

- Ku soo celi xirmadaada Codaynta Boostada ee Codaynta oo dhammaystiran oo ay saarantahay caddaynta khidmadda boostada oo hormaris loo bixiyey Boostada Canada ama ku rid mid ka mid ah sanduuqyada midabka huruudda ah leh ee wax lagu rido inta u dhaxaysa Oktoobar 7 iyo Oktoobar 21 duhurnimada (12 p.m.)
- Xaafad kastaa waxay yeelan doontaa hal sanduuq oo huruud ah Goobuhu waxay ku taxanyihiin: [toronto.ca/VoteByMail](https://toronto.ca/VoteByMail)
- Xirmooyinka Codaynta Boostada oo la soo dhammaystiray waa in la helaa duhurnimada Jimcaha, Oktoobar 21

## Wixii su'aalo ah ama caawimada gelitaanka

- Email: [elections@toronto.ca](mailto:elections@toronto.ca) or call 311
- Wax badan ka baro: [toronto.ca](https://toronto.ca) ama wac 311

## Wakiil

Haddii aadan awoodin inaad qof ahaan u codayso maalmaha loo asteeyey coddaynta, waxaad magaacaban karta wakiil kuu codeeya. Wakiilku waa qof aad ku kalsoon tahay inuu ku codeeyo magacaaga oo ah codbixiye codayn kara doorashada Dawladda Hoose ee Toronto. Buuxi foomka magacaabista wakiilka Codaynta, oo aad saxeedeen adiga iyo wakiilkaagu, oo uu ansixiyey karraaniga Magaalada ka hor Oktoobar 24 saacadu markay tahay 4:30 galabnimo.

Laga bilaabo Sebteembar 1, la xiriir Doorashooyinka Toronto si aad u hesho foomka wakiilashada oo samayso ballan si aad u xaqiijiso adigoo u iimaylgaraynaya [VoterRegistration@toronto.ca](mailto:VoterRegistration@toronto.ca) ama wac 311.

Wax badan ka baro: [toronto.ca/VoterAccommodations](http://toronto.ca/VoterAccommodations)

## Yaa Codayn Kara

Si aad u codayso doorashada dawladda hoose ee Toronto, waa inaad ahaataa:

- Muwaadin Canadian ah; iyo
- Ugu yaraan 18 sano jir; iyo
- Deggane magaalada Toronto; ama
- Madeggane magaalada Toronto, laakiin adiga ama xaaskaagu ku leedihiin guri ama idiinka kireeysan yahay; iyo
- qof aan sharcigu ka mamnuucin codaynta

Waxa aad codayn kartaa hal mar iyadoon la eegayn inta guri ee aad ku leedahay ama aad ka kiraysatay gudaha magaalada. Waa inaad ka codaysaa xaafadda aad deggantahay.

## Gal diiwaanka cod bixiyayaasha

Waa muhiim in la hubiyo in macluumaadkaagu sax yahay, gaar ahaan haddii aad guurtay ama baddashay magacaga tan iyo doorashadii u dambaysay. Haddii aad ku jirto diiwaanka codbixiyayaasha waxaad boostada ku heli doontaa kaarka macluumaadka codbixiyaha. Tani waxay de-dejin doontaa wakhtiga aad ku qaadata goobta codbixinta.

Laga bilaabo Sebteembar 1, hubi, wax ku dar ama cusboonaysii macluumaadkaaga ku jira diiwaanka codbixiyayaasha adigoo:

- isticmaalaya aaladda MyVote web ilaa Sebtembar 23
- emailgaraynaya VoterRegistration@toronto.ca ama wacaya 311 ilaa Oktoobar 14keeda
- Tegeya goobtaada codbixinta inta lagu jiro codbixinta hordhaca ah(Oktoobar 7 ilaa 14) ama maalinta doorashada (Oktoobar 24)

Si magacaagu ugu muuqdo diiwaanka codbixiyayaasha maalinta doorashada ee u dambeeya, dhammaan wixii sixitaan ah waa in la dhammaystiraa Oktoobar 14 Taariikhdan ka dib waxaad naftaada ku diiwaan garayn kartaa goobta cod bixinta marka aad codynayso Oktoobar 24.

Ka baro wax badan: [toronto.ca/elections/Voters](https://toronto.ca/elections/Voters)

## Maalmaha codaynta

### Maalinta codaynta

Isniinta, Oktoobar 24, 2022 10 subaxnimo ilaa 8 habeenimo

### Codaynta hordhaca ah

Horay u codee inta u dhaxaysa Jimcaha, Oktoobar 7 iyo Jimcaha, Oktoobar 14 laga bilaabo 10ka subaxnimo ilaa iyo 7 habeenimo.

Goobahaaga codbixinta hor dhaca ah waxay ka soo muuqan doonaan kaarkaaga macluumaadka codbixiyaha ama hell adiga oo isticmaalaya aaladda MyVote web, [Toronto.ca/elections/MyVote](https://toronto.ca/elections/MyVote).

## Macluumaad ardaydu leedahay

Haddii aad tahay arday oo aad u aqoonsantahay "gurigaagu" inuu yahay meesha aad ku nooshahay marka aanad dheganayn dugsiga, taas oo macnaheedu yahay inaad qorsheynayso inaad halkaas ku noqoto, markaa waxaad xaq u leedahay inaad ka codayso degmadaada "guriga" iyo degmada aad hadda ku nooshahay oo aad dugsiga dhiganayso.

Ka baro wax badan: [toronto.ca/elections/Voters](https://toronto.ca/elections/Voters)

## MyVote

## **Aaladda MyVote web waxa uu leeyahay wax walba oo ku tusaya sidaad u bilaabi lahayd doorashada dawladda hoose ee Toronto.**

Geli cinwaankaaga Toronto si aad:

- Ogaato haddii aad ku jirto diiwaanka cod-bixiyayaasha
- Ku dar, wax ka beddel ama cusboonaysii macluumaadkaaga diiwaanka codbixiyayaasha (Ilaa Sebteembar 23)
- Fiiri musharaxiinta ku tartamaya xaafadaada
- Ogow meesha iyo goorta laga codeynayo
- Arag, soo dejiso ama daabac Macluumaadkaaga Kaarka codbixiyaha
- Hell xaafaddaada iyo khariidad
- Hell macluumaadka gelitaanka ee ku saabsan goobtaada codbixinta
- Eeg muunadda warqadda codbixintaada

**Fiiro gaar ah:** sii wad inaad hubiso MyVote ka hor intaadan shaqsi ahaan u codayn, maadaama goobaha codbixinta ay isbedeli karaan.

Wax badan ka baro: [toronto.ca/elections/MyVote](https://toronto.ca/elections/MyVote)

Waa inaad keentaa aqoonsigaaga marka aad codaynayso, xataa haddii aad ku jirtid diiwaanka codbixiyayaasha.

## **Taageerada laxaad li'ida**

**Haddii aad caqabad kala kulanto cod bixinta, kala xiriir Doorashooyinka Toronto adigoo iimaylka u soo diraya [election@toronto.ca](mailto:election@toronto.ca) ama wac 311.**

### **Goobaha codbixinta**

Dhammaan goobaha aad ku codaynaysid oo dhan waxay leeyihiin taageerada laxaad li'ida Macluumaadka ku saabsan goob kasta, tusaale ahaan marinno, furayaasha albaabbada otomaatiga ah ama Terminalka Caawinta Codbixiyaha, ayaa laga heli karaa: [toronto.ca/elections/Voters](https://toronto.ca/elections/Voters).

### **Qalabka cod bixinta ee la heli karo**

Terminalka Caawinta Cod-bixiyaha waa aalad u oggolaanaysa cod-bixiyayaasha naafada ah in ay si gaar ah iyo iskood u calaamadeeyaan codkooda. Astaamaha waxaa

ka mid ah shaashad taabasho ah, shaqo maqal ah, suufka farta indhoolaha ah, aaladda kababka/tuubada, qalab la iskugu bed-beddeli karo gacanta/lugta iyo muuqaalada zoom si loo habeeyo cabbirka farta iyo kala duwanaanshaha midabka.

Maxadadaha Caawinta Cod-bixiyaha waxa laga heli karaa dhammaan goobaha cod bixinta hormariska ah - laba xaafaddiiba. Haddii aad u baahato isticmaalka Terminalka Caawinta Codbixiyaha maalinta doorashada oo midina aanay ku ool goobtaada codaynta, waxaad codsan kartaa in lagu wareejiyo warqadda codbixinta adiga oo wacaya 311.

## **Adeegyo kale**

- Tilmaamaha ku saabsan sida loo codeeyo ayaa laga heli doonaa dhammaan goobaha codbixinta oo ku qoran farta indhoolayaashu akhriyi karaan iyo 26 luqadood.
- Waraaqaha ballaarinta ayaa laga heli doonaa dhammaan goobaha cod bixinta si loo caawiyo cod-bixiyayaasha aragoodu hooseeya.
- Haddii aadan jir ahaan awoodin inaad gasho gudaha goobta codbixinta, waxaad codsan kartaa in lagugu caawiyo meel kale oo ku taal goobta codbixinta. Tusaale ahaan goobta baabuurta la dhigto ama dhinaceeda. Wac 311 wixii macluumaad dheeraad ah.
- Macluumaadka doorashada ee dhegoolayaasha ama dadka maqalku ku adagyahay ayaa la heli karaa adiga oo wacaya khadka TTY ee 416-338-OTTY (0889).
- Waxaad soo kaxaysan kartaa saaxiib si uu ku caawiyo haddii aadan awoodin inaad keligaa calaamadiso warqadda codbixinta ama waxaad caawimaad weydiisan kartaa sarkaalka doorashada.
- Dhammaan goobaha codbixintu waxay soo dhaweynayaan isticmaalka dadka wax caawiya iyo xayawaanka adeegga.
- Wareejinta warqadda cod bixinta iyadana waxaa la codsan karaa marka ay jirto xaalad uu cod bixiyuhu uu caqabad kala kulmo goobta codaynta ee loo asteeyey.

**Wax badan ka baro: [toronto.ca/VoterAccommodations](https://toronto.ca/VoterAccommodations)**

## **Aqoonsiyada la aqbali karo**

laqoonsi (ID) ayaa loo baahanyahay marka aad codaynaysid. Xusuusnow inaad keento hal kaar oo aqoonsi ah oo muujinaya magacaaga iyo cinwaanka Toronto ee la xiriira

goobtaas codbixinta. Kaarkaga Macluumaadka Cod-bixiyaha looma isticmaali karo aqoonsi ahaan.

## **Tusaalooyin aqoonsiga la aqbali karo:**

- Ruqsadda darawalnimada ee Ontaariyo bixisay ama warqadda ogolanshaha baabuurka (qaybta baabuurka), kaar sawir leh.
- Jeeg shakhsi ahaaneed ee la joojiyay, kaarka deynta ama bayaanka akoonkaaga bangiga.
- Biilasha tamarta ee korontada, teleefoonka ama kabalka TV-ga, biyaha, gaaska ama biilka ka yimid guddiga adeegyada dadweynaha.
- Warqadda lacag bixinta qaybteeda danbe, bayaan T4 ama rasiidhka mushaharka ee uu bixiyo loo shaqeeyaha.
- Bayaanka lacag ku shubidda tooska ah ee Ontario Works ama Barnaamijka Taageerada Naafada Ontaariyo.
- Qiimaynta cashuurta hantida, ogaysiis qiimaynta cashuurta dakhliga, Bayaanka Dheefta Cashuurta Ilmaha.
- Bayaan amaah guri, heshiis kiro guri.
- Warqad tusaysa natiijada ardayga ama Kaarka warbixinta ee Jaamaicad.
- Dokumenti muujinaya degenaanshaha kambaska, oo uu soo saaro xafiiska ama mas'uuliyiinta ka mas'uulka ah degenaanshaha ardayda ee machad dugsi sare kadib.
- Dokumenti kasta oo kale oo ka socda dawladda Canada, Ontaariyo ama degmo ku taal Ontaariyo ama dokumeenti ay soo saartay ama cadeeysay maxkamad Ontaariyo ku taal
- Dukumeenti kasta oo ka socda Golaha Guddi Ontaariyo oo lagu dhisay Xeerka Hindida (Kanada).
- Waraaqaha Caymiska ama warbixinta caymiska.
- Heshiis amaah ama heshiis kale oo maaliyadeed oo lala galay hay'ad maaliyadeed.
- Bayaanka Faa'iidooyinka Caymiska Shaqada ee La Bixiyay T4E.
- Bayaanka Hubinta Dakhliga Waayeelka T4A (OAS), Faa'iidooyinka Qorshaha Hawlgabka Kanada T4A (P), Bayaanka Qorshaha Hawlgabka Kanada ee tabarucaadka.

- Bayaanka Faa'iidooyinka Guddiga Caymiska iyo Badbaadada Goobta shaqada T5007.
- Kaarka CNIB ama kaar urur samafal oo kale ka diiwaan gashan oo bixiya adeegyada dadka naafada ah.
- Dokumenti muujinaya degenaanshaha guriga daryeelka muddada-dheer ee hoos imaanaya sharciga guryaha daryeelka muddada-dheer, 2007, oo uu soo saaray maamulaha gurigu.
- Kaarka isbitaalka ama diiwaankiisa.

Haddii aadan haysan aqoonsi la aqbali karo oo aadan ku jirin diiwaanka codbixiyayaasha, waxaa lagu weydiin doonaa inaad la soo laabato aqoonsigaaga si aad u hesho warqadda cod bixinta.



# Taariikhaha Muhiimka ah

## Sebteembar 1

- Maalinta ugu horraysa oo la codsado Ku Codaynta Boostada
- Maalinta ugu horraysa ee aad wax ku dari kartid, wax ka beddeli kartid ama aad cusboonaysiisid macluumaadkaaga codbixiyaha.

## Sebteembar 23

- Xilliga kama dambaysta ah ee codsiga Codaynta Boostada 4:30 galabnimo.

## Asbuuca Sebteembar 26

- Kaarka Macluumaadka Cod-bixiyaha ayaa ku jira boostada

## Oktoobar 7 ilaa Oktoobar 14

- Codaynta Hormariska ah

## Oktoobar 21

- Doorashooyinka Toronto waa inay helaan xirmooyinka Codaynta Boostada ugu dambayn Oktoobar 21, duhurkii (12 p.m.)

## Isniinta, Oktoobar 24: Maalinta Doorashada



@cityoftoronto



City of Toronto



@cityofto

Web: [toronto.ca/elections](http://toronto.ca/elections) Email: [elections@toronto.ca](mailto:elections@toronto.ca)